Minnesota Department of Education

Division of Compliance and Assistance

# Alternative Dispute Resolution (ADR)

## Haddii aad ku wareertay waxbarashada canuggaaga, waxaa jira siyaaboyin wax lagu xallin karo.

Wac maamuulaha waxbarashada qaaska ee degmadaada. Dhibaatadaada kala hadal. Eeg magacyada maamuleyaasha waxbarashada qaaska ee internetka ku jira.

Meel kale ee aad caawino ka waci karti waa Waxda Waxbarashada ee Minnesota Adeegyada Qilaafka Qaabka Duwan Lagu Xalliyo ee (ADR) waxbarashada qaaska.

Adeegyada ADR waxay caawiyaan qoysaska, dugsiyada iyo hay'adaha inay ka wada hadlaan iyo ka shaqeeyaan ayadoo **dhexdhexaadin** la isticmaalayo ama **kulanka dhexdhexaadiyaha ee Barnaamijka Waxbarashada Khaasahaaneed (IEP).**

## Keebaan doortaa?

Iskuday dhexdhexaadin, haddii aad doonayso jawi waqti ahaan u deggan inaad ka hadasho, cilaaqaadka hagaajiso, nooca dhiibaatada iyo hesho jawaabo. Dhinac saddeexaad ee dhexdhexaad, dhexdhexaadiye, ayaa idinka caawin doonaa inuu qofba qofka kale waxa uu qabo eego iyo heshiis ka shaqeeyo.

Iskuday la kulanka dhexdhexaadiyeya ee IEP, haddii adiga iyo dugsigaaga uu khilaaf idinka dhaxeeyo qorista Barnaamijka Waxbarashada Khaasahaaneed (IEP) ee canuggaaga. Qof dhinac saddeexad ee dhexdhexaad ah, dhexdhexaadiye, ayaa la shaqaynaya nidaamka IEP ee kooxda canugaaga idinkana taliya si khilaafka lagu soo afjaro.

## Macluumaad dheeraada ee ku saabsan kulamada la dhexdhexaadiyaye ee IEP:

- Labadaba waa lacag-la'aan!
- Dhexdhexaadiyaha waxuu qofwaliba ula dhaqmayaa si xurmo leh.
- Adiga iyo dugsiga go'aamada si wadadjir ayaad ku sameynaysaan.
- Inta badan, waxaad heshiis ka gaaraysaan sida lagu qancin lahaa baahida canuggaaga.

## Maxaa dhacaya haddii canuggayga uu haysto qorshe waxbarasho ee ka duwan kan IEP?

Waxaad kalo weydiin kartaa kulan la dhexdhexaadinayo ama dhexdhexaadin haddi aad haysato qorshaha adeegyada qaasahaaneed ee qoyska ee canuggaga yar loogu talagalay (IFSP) ama haddii aad haysato qorshaha faragalinta ee hay'adaha ka dhexeeya (IIIP) sababato waxaad la shaqaysaa hay'ad kale marka lagu sii daro dugsiga canuggaaga.

## Maxaa xiga oo aan sameeyaa?

Na soo wac. Waxaannu war dheeraada kaa siin karnaa dhedhexaadinta ama kulanka dhedhexaadiyaha iyo aan kuu soo dirayno foomka codsashada.

**651-582-8222** ama lambarka lacag-la'aanta
**866-466-7367**
[http://education.state.mn.us](http://education.state.mn.us)